

Guddiga Talabixinta Diiwaangelinta Yaraaneyisa ee DPS

Kulankii 5aad / Caqabadaha Diiwaangelinta Yaraaneyisa, 20kii Abriil, 2022

Arrimaha Mawduucyada	Qoraallo & Linkiyo
Soo-dhaweyn & Isxaadirin	<p>Kulamadu waxay ku bilowdaan 4ta galabnimo soo-dhaweyn iyo isxaadirin. Luuqadaha loo keenay turjubaanka ayaa la sheegay. Toddobaadkan xaadirin lama sameyn si wakhti loogu helo in la wada maqlo codka guddiga oo dhan. Guddigu waxay dhageysteen xafiiska dadweynaha ee FACE iyo xiriiriyeyaasha kale ee DPS jawaabahooda iyo welwelka bulshada. Guddigu waxa ay wadaageen habraaca qoraalka iyo shuruudaha iyada oo loo eegayo sida ay kooxuhu isugu xiran yihiin. Dadka qorista sameynaya ee koox kasta waxay ka shaqeynaayeen qoraalka hordhaca ah ee habraaca oo waxa ay u soo bandhigeen guddiga intooda kale. Xubnaha guddiga waxay markaas sameeyaan faallo-bixin iyo talooyin ku saabsan waxa laga beddelayo waraaqaha shaqada. Waxyaabihii xigay waxaa ka mid ah hagaajinta joogtada ah ee qoraalka iyo uruurinta jawaabaha bulshada oo dhan.</p> <p>***GUDDIGU WAXA AY SII WADEEN WAXA AY KA BEDDELAYAAN QORAALKA INTA AAN DADKA LOO SII GUDBIN!***</p>
Fikradaha Dadweynaha	<p>Intii lagu jiray qeybtan kulanka waxaa lagu dhagestay jawaabaha xiriiriyeyaasha dadweynaha ee FACE iyo DPS. Su'aasha laga hadlaayey waxay ahayd "Maxay maamulka waxbarashada degmadu u baahan yihiin marka ay noqoto in iskuullo la xiro ama marka la isku darayo?" Xafiiska dadweynaha ee FACE waxay xoogaa jawaabo ah siiyeen dadka si ay gacan uga geysteen talada guddiga intii lagu jiray habraacii la qoraayey. Shaqaalaha FACE waxay dadka la kulmeen Jimcihii hore si ay ugu sheegaan akhbaarta shaqadii ay guddigu qabteen. Guddigu waxa ay intaa ka dib u gudbeen inay is weydiyaan wixii ah su'aalo ama qodobbo ay ka jawaabayeen kooxda FACE. Waxaa jiray xoogaa walaac ah oo ku saabsan wacyigelinta kulanka iyo hubinta hab ah in loo wada dhan yahay wada-hadalka iyo faafinta macluumaadka oo ay weheliso turjumaad. Wakhtigii fasaxa ayaa saameyn ku yeeshay in laga gaaro sameynta hawshan.</p>
Sharciyada iyo Shuruudaha Qoraalka	<p>Kulankan ka hor dadka qoraalka sameynaya ee ka socda kooxaha xiriirka ayaa kulan yeeshay. Waxay si wadajir ah u keeneen qoraalka qaar ka mid ah talada iyo shuruudaha lagu xiri karo ama la isugu dari karo iskuullaada. Qeybtan waxaa hoggaaminaayey macallin ka socda SW Denver oo ay caawinaayeen dadkii wax qoraayey. Dedaalkii wada-shaqeynta waxaa ka soo baxay qoraal ka hadlaya saddexda arrimood ee soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none">● Sharciyo● Ka-hortegid● Shuruudo

Arrimaha Mawduucyada	Qoraallo & Linkiyo
	<p>Kooxdu waxa ay wadaageen fikradaha ay ka qabaan shuruudaha iyo sida loogu shaqeyn doono. Xubnaha guddiga waxay bilaabeen in ay u jawaabaan koox ahaan iyo qeyb ahaan diyaarinta qoraalka bilowga ah ee habraaca iyo shuruudaha. Hadafku wuxuu ahaa in la diyaariyo qoraal kama-dambeys ah oo si guud loo wadaagi karo si ay dadku uga jawaabaan. Qoraalka bilowga ah ma aha kii ugu dambeeyey ee waxa uu sii mari doonaa in lagu noqnoqdo marar kale, oo guddiga ayaa wax ku kordhinaya, ka hor intaan loo bandhigin kormeeraha iyo guddoonka waxbarashada.</p>
<p>Muhiimadda & Walaaca</p>	<p>Guddigu waxay soo bandhigeen dhowr tabasho oo qoran iyo arrimo kale. Mid ka mid ah qodobbada muhiimka ah waa in ay rabeen in loo hubiyo in ay dadku arkaan waxqabad intii ay sugi lahaayeen. Su'aalaha kale ee walaaca ah waxaa ka mid ahaa balse aysan ku ekeyn:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Sidee baa looga hortagayaa in aan la jarin xalka ah dhaqaalaha ee wixii loo baahan yahay? Waa maxay habraaca barnaamijyada la sii wadanayo, la beddelayo, ama la goynayo? ● Maxaa la tixgalinayaa marka lagu jiro barnaamijyada kalaguurka ah ee iskuullada la xirayo ama la isku darayo? ● Sidee baa loogu taageerayaa deeqda ah qiimeynta xalkooda dhaqaale, iyadoo la tixgalinayo iskuullada haysta taageero ah qorista waraaqaha lagu helo deeqaha iyo kuwa aan haysan. ● Sidee baa ardeyda ECE loogu tixgalin doonaa tiradooda ardeyda marka la isku darayo ee loo eegayo maalgelinta iyo miisaaniyadda iskuullada oo kala duwan? ● Maxaan sameyn karnaa si loo habsado in aan iskuullada degmadu xirto isla markiiba laga dhigan iskuul kale? ● Ma xaqiijin karnaa in ay qoraalka habraaca iyo shuruuduhu yihiin kuwo gaar ah oo lagu daro waxyaabaha ay ka midka yihiin Wareegtada Oggolaanshaha, TNLI, iyo waxyaabo kale. ● Ma ku dedaali karnaa wax kasta iyo bixinta dhaqaalaha ka hor intaan iskuullo la xirin ama la isku darin? ● Sidee buu noqonayaa habraaca dugsiga dhexe iyo dugsiga sare? ● Sidee baan ku hubin karnaa in ay shuruudaha iyo talooyinka isku mid ka yihiin iskuullada maamulka degmada oo dhan
<p>Tallaabooyinka Xiga</p>	<ul style="list-style-type: none"> ● Sii-wadid ah hagaajinta qoraalka bilowga ah ee talada iyo shuruudaha

Arrimaha Mawduucyada	Qoraallo & Linkiyo
	<ul style="list-style-type: none">• Codsii ah in jawaabo laga helo xubnaha bulshada• Wada-hadal ah wixii tabasho ah ee ka yimaada bulshada ama kooxda